# The Anti-Racism Observatory

Scotland waxaa laga samaynayaa qaab cusub oo lagula dagaalamayo midab kala sooca oo loogu  magac daray The  Observatory. Waxaana loogu talo galay in in lagula socdo sida ay dawlada  Scotland iyo hayadaha kale ee dawliga ahi ay uga qayb qaadanayaan la dagaalnka cunsuriyada.Qorshahan oo loogu magac daray The Observatory waxaa ka qayb qaadan doona khubaro wadankan ka tirsan iyo qaar caalamiya, waxaanay isla eegi doonaan sida ay cunsuriyadu u shaqayso. waxaa uu dawlada Scotland ka caawin doonaa sidii ay u bixin lahayd siyaasado waara oo ku saaabsan la dagaalanka cunsuriyada iyo sidii loo meel marin lahaaba. Si hubaal looga dhigo in ay sharciyadan lagula tacaalayo cunsuriyada ee Scotland ay  waxtar u leeyahiin dadka ay saamaynta aan wanaagsanayn ku yeelatay cunsuriyadu, waxaanu jecel nahay in aanu fikradahiina ogaano.



## Sababta aanu arrintan imika u samaynaynaa maxay tahay?

Xanuunka Covid-19 ayaa kashifay sinaan la’aanta ku salaysan dhinaca midabka dadka ee caalaamka oo dhan. Dawlada Scotland waxaa ay sii kordhisay sidii ay uga go’nayd  in wax laga qabto sinaan la’aanta midabka ku salaysan, gaar ahaana dhinaca caafimaadka. Ilaa laga gaadhayo 2030, dawlada Scotland waxaa ka go’an in ay dhisto Scotland cadaalad ku salaysan oo loo siman yahay “ oo qof walibaaba u arki karo in ay wadankiisii tahay ” Waxaynu u baahan nahay in aynu ka faa’iidaysano dadaalkan cusub, The Observatory waxaa uu talaabo muhiim ah u yahay sidii loola socon lahaa ee looga dhabayn lahaa dadaalkan

# Maxaa hore loo sameeyay, maxaanay hore ugu shaqayn waayeen?

Waxaa hore u jiray 39 qorshe, kuwaasoo jiray muddo ka badan 20 sanadood, oo kuna saabsanaa sinaanshiyaha dadka kala midabka ah ee Scotland, waxaana ku jiray 817 balan-qaad iyo talaabooyin la qaadayay. Inkasta oo kuwaasi ay jireen, haddana horumar hagaagsan lagama gaadhin.



Sida ka muuqata tilmaamahan hawlaha ay dhawaan qabteen ururka qaabilsan la dagaalnka midab kala sooca ee loo yaqaano The Coalition for Racial equality and Rights (CRER) waxaa jiray qorshayaal mar walba lagu noq-noqonayay oo is hor taagayay in horumar la sameeyo.

1. Ugu horaynta marka lagu dhawaaqo qorshe cusub oo la xidhiidha sinaanta dadka kala midabka ah waxaa laga sameeyaa guux faro badan laakiin lama eego waxyaabahii ka horeeyay ee la soo maray.
2. Dadwaynaha looma sheegi jirin waxyaabaha lagu sameeyay fikradahii ay soo bandhigeen inta badana waxba kumay lahayn go'aamada la gaadhayay.
3. Marka marka la bilaabo qorshayaasha cusub way guul daraysan jireen iyada oo sababtuna ay tahay in la qaadayay talaabooyin aan wax saamayn ah lahayn.

Cidna lagulama xisaabtamaynin guul-daradaasi, maadaama aanay dad isku mid ahi aanay ka shaqaynin qorshayaashaasi, waxaana mar walba is bedelayay waxyaabaha siyaasad ahaan ahmiyada la siinayay

# Sidee ayuu sharcigan cusub ee loogu magac daray The Observatory uu u noqonayaa mid ka duwan kuwii hore?

Si loo sameeyo is bedel dhab ah oo waara oo uu keeno  qorshahan cusub ee The Observatory  oo saamayn ku yeesha qaybaha dadwaynaha ee uu saamaayeen midab kala soocu waxuu dhigayaa qorshahani :

1. **In lagu dhaqmo sharciayada lagula dagaalamayo midab kala sooca:** Waa in aynu si waxtar leh aynu uga hor nimaadnaa sharciyada xoojinaya cunsuriyada, waana in si wayn loogaga shaqeeyaa hayadaheena. ( Tusaale ahaan, Ururada, Hayadaha dawliga ah oo ay ku jiraan dugsiyada, waaxda caafimaadka ee NHS iyo dawlada Scotland )

2. **Waa in ay dadwaynahu hormuud ka yihiin:** Siyaasadaha loo dejiyo qaybaha dadwaynaha ka tirsan ee ay samaayso cunsuriyadu, waa in ay iyagu hogaamiyaan qorshahan.
3. **Waa in la horumariyaa isla xisaabtanka loo samaynayo bulshada.** Dawladu waa in ay la socotaa waxyaabahii hore u soo dhacay. Waana in ay la socotaa sida loo hir gelinayo sioyaasadaha la dagaalanka cunsuriyada, Waana in ay horumarka la sameeyay ku war geliyaan qaybaha bulshada ee cunsuriyadu ay saamayso.
4. **Waa in ay daryeelaan oo ay ilaaliyaan qaybaha bulshada ee la cunsuriyadeeyay:** Waa in goobo ay ku badbaadayaan loo sameeyaa qaybaha bulshada ee cunsuriyadu ay saamaysay si loo qaabeeyo siyaasadaha lagula dagaalamayo cunsuriyada.

# Muxuu soo kordhinayaa qorshahan The Observatory?

Talaabooyinkan soo socda ayaa loo soo bandhigay in lagu daro qorshaha The Observatory. Haseyeeshee, hawshani waa mid weli socota, Waxaananu jecel nahay in aanu maqalno fikradahiina ku saabsan qorshahan. Qorshahan waxaa ku jira wax ka bedel ay dadku dib ugu qaabaynayaan qorshahan, si markaa sida uu u shaqaynayo The Observatory ay u noqoto mid ka duwan hindisayaasha halkan lagu soo bandhigay.

1. In la asteeyo oo la isla garto hawlahii hore loo qabtay iyo kuwa imika socda ee ku saabsan la dagaalanka cunsuriyada, si markaa aynu ula socono.
2. In laga baaraan-dego macluumaadka la hayo ee ku saabsan cunsuriyada iyo la dagaalanka cunsuriyada ee ay sameeyaan hayadaha dowlada iyo kuwa gaarka loo leeyahay.
   - Qorshahan The Observatory waxaa uu samayn doonaa in si haboon loogu shaqeeyo macluumaadka la hayo ee lagu horumarinayo la dagaalanka cunsuriyada.

3. **IN DAWLADA SCOTLAND LAGULA XISAABTAMO LA DAGAALANKA CUNSURIYADA.** Tusaale ahaan.

   - Waa in ay hayadaha dawladu ay qaadaan talaabooyin ay kula soconayaan sida ay uga shaqaynayaan hawlahooda la dagaalanka cunsuriyada
   - Waa in ay hayadaha dawladu ay ka baaraan degaan gol daloolooyinka ka soo baxa macluumaadka laga hayo cunsuriyada iyo cawaaqibka ay yeelan karaan gol-daloolooyinkaasi iyo sidii looga gudbi lahaaba.

4. **IN LA DHIIRI GELIYO WADA SHAQAYNTA** hayadaha dawlada iyo dadka ay sida saamaynta aan wanaagsanayn ku yeelatay cunsuriyadu.

5. **IN HORMUUD LAGA NOQDO SIDII QORSHAYAASHA DIB LOOGU QAABAYN LAHAA**, marka ay timaado siyaasadaha la dagaalanka cunsuriyada, iyo hawlaha loo qabanayo dadka saamaynta xun ay ku yeelatay cunsuriyadu.

Waxaanu aad u jecel nahay inaanu maqalno fikradahiina ku saabsan The Observatory iyo sida ugu wanaagsan ee uu u shaqayn karayo, si loogu helo in siyaasadaha iyo sida looga shaqeeyo Scotland. Fadlan waxaad telefoonkaaga saartaa QR code si aad u buuxisid sahan lagu ogaanayo waxyaabaha ay dadku qabaan oo laba daqiiqadood kugu qaadanaya.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah waxaad email noogu soo diri kartaa **iggantiracism@gmail.com**.

